



*The Transitional Federal Government of the Somali Republic*  
*Communication Office*

Ref: XRW/OM/PR 0241/09/12

Date: Sept. 16, 2012

**Ra'iisulwasaaraha Dr. Abdiweli Mohamed Ali**  
**Caleemasaarka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaaliga**  
**Soomaaliya**  
**September 16<sup>th</sup> , 2012**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Fedraaliga ah ee Soomaaliya,  
Mudane Hassan Sheikh Maxamud  
Gudoomiyaha Baarlamanka Federaalka ee Soomaaliya,  
Mudane Maxamed Sheikh Cusman Jawaari  
Madaxweynihii Hore, Mudane Sheikh Sharif Sheikh Ahmed  
Mudanayaasha Baarlamanka Federaalka Soomaaliyeed  
Mudanayaal iyo Marwooyin,  
Maanta waa maalin weyn oo taariikhi ah oo aan u dabaal degeyno is-  
beddelka curdunka ah ee dalkeenna ka dhashay. Annagoo si wadajir  
ah u soo dhoweeyneyna Doorashada Xilka Madaxweynaha Dowladda  
Fedraalka ah ee Soomaaliya ee loo igmaday Mudane Hassan Sheikh  
Mohamoud.

Mudane Madaxweyne,  
Waxaan si waafi ah oo kal iyo laab ka timid kuugu hambalyeynayaa  
guusha aad gaartay, taas oo ka dhabaysay Himiladii is beddel doonka  
ahayd ee Bulshada Soomaaliyeed ka dhursugaysay. Aqoonta aad u  
leedahay Arrimaha Bulshada ee Dalkeenna iyo khibradda gaarka ah ee  
aad u leedahay Muqdisho ayaa si buuxda uga tarjumi doona diyaarinta  
Qorshaha Guud ee Bulshada Soomaaliyeed.

Taariikhda 22kii sano ee ugu dambaysay, waxay ahayd mid madow oo  
aan ilaah ka baryayo in ay naga harto :

- Burbur Bulsho
- Colaado iyo Abaaro
- Dagaal Sokeeye, Dagaal Dariiqooyin Diineed iyo Dagaallo aan ujeeddo lahayn

Colaadda oo laga guuro, Nabad iyo Dib u dhis loogu guuro waxay  
qaadan wakhti dheer, halka in wax la dumiyaa ay qaadato wakhti yar  
oo kooban.

Maanta waxay bilow ka tahay Dalka oo hela Nabad Waarta, Xasilooni  
iyo Degenansho. Maanta waxay bilow ka tahay Ubadka Soomaaliyeed  
oo hela waxbarasho aasaasi ah, Dhallinyarada oo hesha shaqooyin,  
mustaqbal ku bedelata burcadnimada iyo xagjirnimada in ay noqdaan  
Dhakhaatiir, ganacsato, iyo injineraadii dib u dhiska.

Doorashadii Madaxweynaha ee sida Dimoqraadiga ah ee Xasiloon u qabsoomtay waxay bilow ka tahay inaan u guurnay mustaqbal rayn rayn leh, kana guurnay KU MEELGAARNIMO.

Mudanyaal iyo Marwooyin,

14kii bilood ee ugu dambeeyey waxaan gaarnay Guulo fara badan oo innagu simay Madasha aan maanta ugu dabaal degeyno Caleema Saarka Madaxweynaha Dowladda Fedraaliga ee Soomaaliya.

Maanta waxaan diyaar u nahay inaan dib hanano Doororkii iyo Qiyamkii aan Caalamka ku lahayn

Dowlad ku-meel gaar ah oo bedesha – Dowlad kale oo KU MEEL GAAR AH.. Waa Laga Baxay. Waa Guusha ugu Weyn ee inoo soo hoyatay.

Mudanyaal iyo Marwooyin,

Mustaqbalkii Soomaaliyeed wuxuu ku jiraa Gacmaheenna, waa inaan laba kala doorano:

- Kobcinta Guulihii La gaaray iyo
- In si fudud ay faraheenna uga baxdo

Waxaan hubaa in kuligeen aan diyaar u nahay Kobcinta iyo meel marinta Guulihii la gaaray. Oo Fadhigeenna maanta iyo Caleema Saarka Madaxweynuhu ka yahay MARKHAATIGA ugu weyn.

Mudanayaal iyo Marwooyin,

Qaraxii Hotel Jazeera ee fuleynimada ahaa ayaa Tusaale u ah, in howsha dhiman iyo tubtu la socdaa ay dheer yihiin. Cadowga Nabaddu wuxuu Maleegayaa dhibaato, waxay ka soo horjeedaan ifafaalada soo if baxday ee ah Horumarka, Amniga iyo Dib u dhiska.

Howsha adag ee Mustaqbulka uma Taal qof gooniya – waxay sugeysaa Madaxweynaha, Xukuumadda Cusub iyo Dhamaan Shacabka Soomaaliyeed in ay isugu geeyaan Maskaxdooda iyo Muruqooda.

Beesha Caalamka waxaan leeyahay:

Waxaan ka Mahad Celinayaa Taageeradii aad ka geysateen in Arrimaha Soomaaliya ay soo gaaraan horukacan Balaaran wakhti aad u kooban.

Waxaan u Mahad Celinayaa Walalaaheen AMISOM, Wadamada deriska aan nahay ee sida joogtada ah u taageera Xasilinta Dalkeenna.

Waxaan Baaq u dirayaa Shacab Weynaha Soomaaliyeed in ay si hagar la'aan ah u taageeraan Madaxweyne Hassan Sheikh Maxamuud iyo Xukuumadda Mustaqbalka si ay u gutaan waajibaadyada Balaaran ee horyaal.

**Waxaan Idiin Rajeynayaa Guul iyo Barwaaqo  
Dib u Laaban Mayno, Aan horay u soconno**

